# EWC III

## Shirka Caalimiga Saddexaad ee ku saabsan Digniinta ugu horayso

*Min fikrad ilaa waxqabad*

27  29 Marso 2006
Bonn, Jarmalka

# Horumarinta Hababka Digniinta ugu Horayso: Liis warbixineed

International Strategy
ISDR
for Disaster Reduction

Federal Foreign Office

# HORDHAC

Waxay Digniinta ugu horayso tahay cunsurka ugu wayn ee halista masiibada lagu yareeyo. Waxay ka hortegaysaa nafta dhumayso waxayna yaraynaysaa raadka dhaqaale iyo maadigaba ah ay masiibada ku yeelanayso. Si ay u noqdaan wax ku ool, waxay hababka digniinta ugu horayso u baahan yahiin in si waxqaad leh loogu soo daro jaaliyadaha ku jiro halista, in si wax ku ool ah loo gaarsiiyo fariimaha iyo digniinta loona hubiyo inay jirto xaalad joogto ah oo diyaar-garoow.

Bisha Janaayo 2005, waxaa Shirka Adduunka ee ku saabsanaa Dhimista Masiibada lagu go'aamiyay "Hyogo Framework for Action 2005-2015: Building the Resilience of Nations and Communities to Disasters". Waxaa ku jireen tixraacyada cad ee muhimada digniinta ugu horayso, iyo dhiirigelinta horumarinta *"qababka digniinta ugu horayso ee loogu talo galay dad, gaar ahaan digniin ku habboon waqtiga iyo inay fahmaan kuwa halista ku jiro (…) ay ku jirto tusmada ku saabsan sida wax loogu qabsado digniinta (…)"* (para. 17, ii.d.9).

Shirka Saddexaad ee Caalimiga ah ee ku saabsan Digniinta ugu Horayso (EWC III) ee lagu qabtay Bonn, Jarmalka 29-29 Maarso 2006 waxaa lagu soo bandhigay fursadda soo bandhigidda cusub iyo cusboonaynta mashruucyada digniinta ugu horayso iyo sida looga hadlo dhibaatooyinka dabiiciga ah iyo halista ku aadan adduunka iyo sida raadka ay ku yeelanayaan soo yaraynta iyadoo la hirgelinaayo digniinta ugu horayso oo ku aadan dadka digniinta loogu talagalay. Waxaa dokumentigaan 'Horumarinta Hababka Digniinta ugu Horayso: Liis warbixineed' loo soo sameeyay sida natiijada ka soo baxday shirka, sidii labaduuba u war-geliyo iyo u muujiyo wada-hadalka iyo tusaalooyinka la-taaban karo ee laga hadley shirka, iyo in lagu kaalmeeyo hirgelinta waxyaabaha ay ka samaysan tahay digniinta ugu horayso ee Shabakadda waxqabadka ee Hyogo.

Liiska warbixinta, oo ka dhisan afarta cunsur oo muhiimka u ah hababka digniinta ugu horayso oo wax ku oolka ah, waxay ujeeddadeeda tahay inay ahaato liis fudud ee waxqabadyada ee xukuumadaha wadaniga ah ama ururada jaaliyadda ay soo gudbin karaan markii la samaynaayo ama la qiimaynaayo hababka digniinta ugu horayso, ama layska eegaayo in habsocodsiinada muhiimka ah ay jiraan. Ma loogu talogelin inuu ahaado bug mashruuceed dhammaystiran, laakin inu ahaado mid farsamo, aan ahayn qalabka tixraacidda farsamo si loo hubiyo in cunsuriyadda intooda badan ee habka digniinta ugu horayso oo fiican ay jiraan.

## Mahad-celin

Waxaa Eegidda Liiska bilaabay xoggaynta Shirka Saddexaad ee Caalamiga ee Digniinta ugu Horayso oo ay la socoto kaalmada maaliyadeed ee Xukuumadda Jarmalka. Waxaa soo sameeyay mashruuca la-taliyaha Alison Wiltshire, uu saldhiggisu yahay ISDR Platform for Promotion of Early Warning (PPEW) ee Bonn. Markii lagu daray wararka la soo aruuriyay labada maalin iyo bar uu shirka socday, waxaa xitaa laga helay waxyaabo micnaawi ah ururada iyo shakhsiyaadka ka qaybgalay digniinta ugu horayso iyo dhimista halista masiibada, ee habka caalamiga ee Qaruumaha Midoobay iyo waxii ka xaggeeyo.

Waxaa boogaadin iyo mahad-celin loo soo jeediyay dhammaan dadka ka qayb galay waxqabadkaan laysku kaashaday, ay ku jiraan ka qaybgalayaasha iyo soo badhigayaashaa mashruuca ee Shirka Saddexaad ee Caalimiga ah ee ku saabsan Digniinta ugu Horayso oo si furan u la qaybsaday aragtiyadooda, welwelkooda iyo waayo-aragnimadooda la taaban karo ee ku saabsan sida loo gaari karo hababka digniinta ugu horayso ee wax ku ool leh oo dadka ka dhigaayo waxaa ugu muhiimsan guudihiisa.

> *"Waxay dalalka soo saarayo siyaasadda sharci u dejinta waxqabadyada hay'adeed ee dhimista halista masiibada oona awood u leh inay sameeyaan ayna dabogalaan horusocdsiinta iyaga oo u leh tilmaamayaasha gaarka ah iyo cabiraadda waxay leeyihiin awoodda ugu wayn ee ku maareeyaan halista iyo inay gaaraan oggolaansho baahsan, ka qaybgalka, iyo u caddeeysanaanta tilaab-qaadista dhimista halista ee dhammaan qaybaha bulshada. "*
>
> Hyogo Framework for Action 2005-2015: Dhisidda dib u soo noolaynta Ummadaha iyo Jaaliyadaha ee Masiibooyinka, Paragarfka 16.

# WAXA GUDAHA KU QORAN

Waxay ujeeddada dokumentigaan tahay inay soo bandhigto eegidda liis gaaban, caadi ah ee aasaaska cunsurada, waxqabadyada iyo farsamooyinka la socdo hababka digniinta ugu horayso. Waxaa looga dan lee-yahay inay noqoto qalabka aan farsamo ahaan loo xigan karin intii ay ahaan lahayd liis ballaaran ‘ sida loo qabto’ ee ku saabsan qaabaynta hababka digniinta ugu horayso.

## Sida loo Isticmaalayo liiska warbixinta

Waxuu dokumentiga u kala jaban yahay labo qaybood oo isku xiran oo ah in loo akhriyo si nidaamsan. Waxaa qaybta koowaad lagu bixinayaa saldhigga aasaaska ee wararka iyo arrimaha muhiimka u ah digniinta ugu horayso. Waxay qabta labaad tahay tixanayaasha ee eegidda liiska waxqabadka leh iyo wax bilaabidda ah in la tixgeliyo markii la samaynaayo ama la qiimaynaayo hababka digniinta ugu horayso.

1. ***Cunsurada muhiimka u ah digniinta ugu horayso, arrimaha udub-dhexaadka ah iyo falayaasha digniinta ugu horayso***

Qayb gaaban ee ku saabsan afarta cunsur ee digniinta ugu horayso: garashada halista; la-socodka farsamo iyo adeegga digniinta; isgaarsiinta iyo faafinta digniinta; iyo awoodda jawaab-celinta jaaliyadda waxay ku jiraan diirad-saarista waxyaabaha waa-wayn ee ka mid ah habka digniinta ugu horayso ee ku aadan dadka, iyo sababta ay mid kastaba u yahay muhiim.

Waxaa u sii dheer afarta cunsur, arrimaha a udub-dhexaadka oo aan looga maarmin horumarinta iyo xajinta hababka digniinta ugu horayso ee la soo qayaxay. Waxaa ka mid ah maamul wax ku ool ah iyo qabanqaabooyinka hay’adeed, wax ka qabashada khatarta isku dhafan ee digniinta ugu horayso, ka qaybgelinta jaaliyadaha deegaanka iyo tixgelinta ah in la siiyo fiiro gaar ah labka iyo dheddiga (jinsiga) iyo kala duwanaanta dhaqanka.

Micnaynta falayaasha muhiimka ah ee ka qaybgalay waxqabadyada digniinta ugu horayso, iyo dhoowrkooda iyo mas’uuliyadahooda, waxaa lagu daray in lagu sameeyo qaar ka mid ah nuxurka iyo shaldhigga aasaasiga ah ee liiska falayaasha muhiimka ah ee lagu soo bandhigay biloowga liis warbixineed kasto.

2. ***Eegidda liiska waxqabadyada farsamadeed ee lagu caawinaayo samaynta, qiimaynta ama dib loogu hagaajinaayo habka digniinta ugu horayso***

Si loo fududeeyo isticmaalidda iyo farsamaynta, waxaa loo samaynayaa mid kasto liis khaas ah afarta cunsur ee digniinta ugu horayso. Waxaa sii dheer in liiska warbixinta lagu diyaariyay oo kale arrinta muhiimka ah ee mamul iyo qabanqaabooyinka hay’adeed oo sabab u ah muhimada arrintaan ee lagu xajinaayo wax ku oolnimada hababka digniinta ugu horayso.

Liisas warbixineed kasto waxaa lagu kooxeeyay moowduucyo tixane ah ee waa-wayn waxaana ku jiraan liiska caadiga ah ee waxqabadyada ama tilaabooyinka, haddii la dabosocdo, lagu samaynaayo saldhig adag oo lagu dhisaayo ama lagu qiimaynaayo habka digniinta ugu horayso.

> *“Wax badan ayaa laga bartay dadaalada looga hortegaayo masiibooyinka ee jaaliyadaha saboolka ah ee dalalka soo horumaraayo. Waxay siyaasadda ka hortegiida tahay mid aad muhiim u ah in loo dhaafo xukuumadaha iyo hay’adaha caalamiga keligood. Si loogu guulaysto, waa inay ku soo dartaa bulshada rayidka, qaybta hantida gaarka ah iyo warbaahinta. ”*
>
> Kofi Annan
> Xoghayaha Guud ee QM
> Toban guurada Dhimista Masiibada Dabiiciga ah (IDNDR)
> Barnaamajka Shirka
> Geneva, Luulyo 1999

# HABABKA DIGNIINTA UGU HORAYSO EE DADKA

## 1. Cunsurada ugu muhiimsan

Waxay ujeeddada hababka digniinta ugu horayso ee ku aadan dadka tahay in xoog loogu yeelo shakhsiyaadka iyo jaaliyadaha ku jira halista masiibada si ay wax uga qabtaan waqti ku filan iyo si ku habboon si loo dhimo suurto-gelidda dhaawaca shakhsiyadeed, dhuminta nafta iyo khasaaraha ku imaanaayo hantida iyo bay'adda.

Hab digniin oo buuxa wax ku oolna ah wuxuu ka samaysan yahay afar cunsur oo isku xiran, kana mid ah aqoonta halista iyo dayacanka ilaa iyo awoodda looga jawaabcelinaayo. Farsamada ugu fiican ee hababka digniinta ugu horayso waxay kale oo ay lee-yahiin isku xirnaansho xoog leh iyo isgaarsiin wax ku ool ah ay soo maraan inta u dhexayso dhammaan cunsurada.

### Garashada halista

Halisyada ka imaan karo halista iyo dayacanka isku jiro ee deegaan gaar ah. Qiimaynta halista waxay u baahan tahay in si isdaba jog ah loo aruuriyo oona baaro wararka waana in tixgilin lagu is beddelidda halisyada iyo dayacanka ka soo baxa habsocodka sida magaalaynta, isbeddelka dhulka loo isticmaalo miyiga, nabaad-guurka bay'adda iyo isbeddelka cimilka. Qiimeynta halista iyo Maps-ka waxay ka caawinayaan dadka inay si firfircoon wax u qabtaan, kala mudnaaysiiyaan baahida habka digniinta ugu horayso iyo inay tilmaamaan diyaarinta ka hortagga iyo ka jawaabcelinta masiibada.

### Adeegga La-socodka iyo Digniinta

Adeegga digniinta waxuu ku fadhiyaa buruqda dhexe ee habka. Waa inay jirto saldhig cilmiyeed fiican ee lagu saadaalinaayo laguna oddorosinaayo halisyada iyo hab digniin ee saadaalin iyo oddoris fican oo shaqaynaayo 24 saacadood maalintii. La-socodka aan kala go' lahayn ee barametereka dhibaatooyinka iyo horseedayaasha waa u muhiim si loo abuuro digniin habboon isla waqtigaas. Adeegyada digniinta ee halisyada kala duwan waa in lagu xiriiriyaa halka ay suurto gal ka tahay si loo helo faa'iidada loo dhan yahay ee shabakadaha hay'adeed, habsocodsiin iyo isgaarisiineed.




*Afarta cunsur oo muhiimka ah ee ku aadan dadka ee hababka Digniinta ugu*

**Horayso:** UN/ISDR Saldhigga Horay loogu dhigaayo Digniinta ugu Horayso

### Faafinta iyo Isgaarsiinta

Waa inay digniinta gaarto kuwa ku jiro halista. Waxaa muhiim ah in faariin cad ay ku jiraan warar caadi ah, waxtar leh si loo awoodo in looga jawaabo oo ka caawinayso badbaadinta nolosha iyo hab nololeedkooda. Waa in la tilmaamaa habaka isgaarsiinta heer goboleed, qarameed iyo jaaliyadeed iyo in la sameeyo codad maamuleed. Ku isticmaalidda mariinaha isgaarsiinta waa lagama maarmaan si loo hubiyo in dad badan intii suurto gal ah loo ogaysiiyo, si looga hortago inysan imaan guul darro mariin kasto, iyo in la xoojiyo farriinta digniinta.

### Awoodda jawaabcelinta

Waxaa muhiim ah in jaaliyadaha ay fahmaan halistooda; ay xushmeeyaan adeegga digniinta waana inay gartaan sida looga hortegaayo. Barnaamajka waxbarashada iyo u diyaargaroowga waxay ka ciyaarayaan qayb muhiim ah. Waxaa kale oo muhiim ah in qorshayaasha la meeleeyo, si fiican loo farsameeyo lana tijaabiyo. Waa inay jaaliyadda si fiican loogu wargeliyo kala doorashada ku dhaqmidda asluubeed, helidda meelaha looga baxsanaayo (looga qaxaayo), iyo sida ugu fiican oo loogu gaysanayn khasaaro iyo dhuminta hantida.

## 2. Arrimaha udub-dhexaadka ah

Waxaa jiraan arrimo qaanso-sare ah oo loo baahan yahay in la tixgeliyo markii la qorshaynaayo iyo lagu haynaayo gacanta hababka digniinta ugu horayso.

**Maamul wax ku ool ah iyo qabanqaabooyinka hay'adeedka**

Waxu maamul si fiican u horumarsan iyo qabanqaabooyinka hay'adaha kaalmaynayaan guusha horumarinta iyo xajinta hababka digniinta wanaagsan. Waxay yahiin aasaaska ay ku dhisan yahiin afarta cunsur oo horay loogu soo qayaxay, oo la xoojiyay gacanatana lagu qabtay.

Waxaa lagu dhiirigelinayaa maamulka fiican shabakadaha sharciyeed iyo nidaaminta waxaana lagu kaalmaynayaa isku-hawlid siyaasadeed ee waqti-dheer iyo qabanqaabooyinka wax ku oolka ah ee hay'adaha. Waa inuu maamulka qabanqaabooyinka wax ku oolka ah uu dhiiri-geliyaa go'aan gaarista deegaanka iyo qaybgalka oo lagu kaalmaynaayo maamulka ballaaran iyo ilaha awoodaha ee heer qaran ama gobol.

Waa in la sameeyo isgaarsiin taagan iyo isku duwid u dhexayso kuwa ku hawlan digniinta ugu horayso.

**Waxqabadka halista tirada badan**

Halka ay ka tahay suurto gal, waa in hababka digniinta ugu horayso ay ku xirnaadaan dhammaan hababka ku salaysan halista. Salaanka dhaqaalaha, xajinta iyo waxqabadka wax ku oolka ah waa lagu sii hagaajin karaa haddii hababka iyo waqabadyada hawlqabadka la sameeyo lana xajiyo iyada oo lagu guda jiro shabakadda ujeeddo-badanka oo tixgelinayso halisyada iyo baahida ay qabaan kuwa isticmaalo.

Waa inay hababka digniinta ugu horayso ee halista tirada badan la isticmaalaa ka badan intii la isticmaalo habka digniinta ugu horayso ee halka halis, sidaas darteed waa inay sameeyaan hawgal aad u fiican oo lagu kalsoonaan karo markii ay jiraan halisyo sare, sida tsunami, oo mar badan dhicin. Hababka tirada badan waxay ka caawinaysa dadwaynaha inay si aad u fiican u fahmaan baaxadda halista ka hor-imaanayso iyo dib u xoojinta u diyaargaroowga waxqabadka loo baahan yahay iyo jawaabcelinta la siinaayo digniinta.

**Ka qaybgalka jaaliyadaha deegaanka**

Waxay hababka digniinta ugu horayso ee ku aadan dadka ku tashanayaan ka qaybgalka tooska ah ee kuwa ay toos u taabanayaan halisyada. Haddiise aysan jirin ka qaybgalka maamulada deegaanka iyo jaaliyadaha halista haysato, xukuumadda iyo faragelinta hay'adeed iyo jawaabaha laga bixinaayo dhacdooyinka halista ah waxay noqon karaan kuwo aan isku dheeli-tirnayn.

Waxqabadka digniinta ugu horayso ee deegaan, oo ay si wax ku ool ah uga qaybqaadanayaan jaaliyadaha deegaanka, waxay awood siinayaan jawaab ka bixinta dhibaatooyinka iyo waxyaabaha loo baahan yahay. Sidaan, waxay jaaliyadaha deegaanka, kooxaha rayidka iyo dhismaha dhaqameed ay wax ugu biiri karaan dhimista dayacanka iyo xoojinta awoodaha deegaaneed.

**Tixgelinta jinsiga (lab-dheddig) iyo Kala duwanaanta Dhaqanka**

Si loo sameeyo hababka digniinta ugu horayso waxaa muhiim ah in la aqoonsado inay kooxaha kala duwan lee-yahiin dayacnimo kala duwan sida uu qabo dhaqanka, jinsiga ama waxyaabaha kale oo raad ku yeelan karo awooddooda si ay diyaar ugu noqdaan in si wax ku ool ah, uga hortagaan ugana jawaabaan masiibooyinka. Waxay dumarka iyo ragga inta badan ka ciyaaraan doowrar kala duwan bulshada waxayna u kala helaan si kala duwan wararka markii lagu jiro xalad masiibeed. Waxaa sii dheer, waayeelka, kuwa curyaanka ah iyo kuwa dhaqaale-bulshadeedka ka faa'iidaysan karin ayaa ah kuwa dayaca badan.

Wararka, qabanqaaboyinka hay'adeed iyo hababka digniinta waa inay ahaadaan kuwo ku habboon in wax looga qabto baahida koox kasto ee ka mid ah jaaliyad dayac kasto.

## 3. Falayaasha Muhiimka ah

Sida loo horumariyo loona hirgeliyo si wax ku ool ah habka digniinta ugu horayso waxaa loo baahan yahay inay ku biiraan iyo isku duwaan shakhsiyaad iyo kooxo baaxad leh ee kala duwan. Waxay liiska soo socoto bixinaysaa micnayn gaaban noocyada ururada iyo kooxaha loo baahan yahay inay ka qaybqaataan hababka digniinta ugu horayso iyo hawlahooda iyo waajibaadkooda.

**Jaaliyadaha,** gaar ahaan kuwa sida aadka dayac u ah, waxay muhiim u yihiin hababka digniinta ugu horayso ee ku aadan dadka. Waa inay si wax ku ool ah uga qaybgalaan dhammaan dhinacyada dhismaha iyo hawlqabadka ee hababka digniinta ugu horayso; iyo inay awood u yeeshaan inay wax ka qabtaan sida loo gaabiyo dhimashada ama khasaarada.

**Dawladaha Hoose,** sida jaaliyadaha iyo shakhsiyaadka, waa udub dhexaadka hababka digniinta ugu horayso ee ku aadan dadka. Waa inay xukuumadaha xoojiyaan, ka lahaadaan aqoon tixgelin mudan halisyada jaaliyadahooda ku dhici karo, waana inay si firfircoon uga qaybqaataan qorshaynta iyo gacan ku haynta hababka digniinta ugu horayso. Waa inay fahmaan wararka talosiinta ay helayaan ayna awood u lahaadaan inay ka bixiyaan talo, tusaale iyo inay ka qayb-geliyaan dadwaynaha si loo kordhiyo nabadgelyada guud loona dhimo dhuminta suurto galka ah ee ilaha ay jaaliyadda ku xiran tahay.

**Xukuumadaha Qaranka** waxay mas'uul ka yahiin herarka ugu sareeyo ee siyaasadaha iyo shabakadaha oo fududaynaayo digniinta ugu horayso iyo hababka farsamadeed ee saadaalinaayo soona saaraayo digniinta dhibaatada qaranka. Waa inay xukuumadaha qaranka iyo hay'adaha isla shaqeeyaan si loo xoojiyo awoodaha digniinta ugu horayso lana sugaa in digniinta iyo jawaabaha la xiriiro ay ku aadan yahiin dadyoowga dayacanka ah. Waxaa sidoo kale muhiim u ah bixinta kaalmada ee la siinaayo jaaliyadaha iyo xukuumadaha si ay u sameeyaan awoodaha hawlgalka.

**Hay'adaha iyo ururada gobolka** waxay ka ciyaaraan doowrka lagu bixinaayo aqoonta xirfadda leh iyo talosiinta oo looga kaalmaynaayo dadaalada qarameed si loo horumariyo loona xajiyo awoodaha digniinta ugu horayso ee dalalka isla wadaago isku bay'adda joqoraafi. Waxaa dheer, inay dhiirgelinayaan isku xirka ururada caalamiga ah iyo inay si wax ku ool ah u fududeeyaan farsamooyinka digniinta ugu horayso ee dalalka isku dhow-dhow .

**Hay'adaha caalamiga ah** waxay samayn karaan isku duwidda caalamiga, habaynta, iyo kaalmaynta lagu bixinaayo waxqabadyada digniinta gu horayso ee qaraka iyo inay sii hagaajiyaan is-dhaafsiga faahfaahinta iyo aqoonta u dhexayso dalalka iyo gobolada gooni-gooni ahaan. Waxaa kaalmaynta ka mid noqon karo bixinta wararka talosiinta, kaalmada farsamo, iyo siyaasad iyo kaalmo abaabulan si loogu caawiyo horumarinta iyo awoodaha hawlqabad ee maamulada qaranka ama hay'adaha.

**Ururada aan dowliga ahayn** waxay ciyaaraan doowrka kor loogu qaadaayo garaadka shakhsiyaadka dhexdooda, jaaliyadaha iyo ururada ka qaybqaato digniinta ugu horayso, gaar ahaan heerka jaaliyadda. Waxay kale oo gacan ka gaysanayaan hirgelinta habka digniinta ugu horayso iyo u diyaarinta jaaliyadaha masiibooyinka dabiiciga ah. Waxaa ku si dheer, inay ka ciyaari karaan doowrka u doodidda muhiimka ah si looga caawiyo in la hubiyo in digniinta ugu horayso lagu sii hayo ajendada sameeyayaasha siyaasadda xukuumadda.

**Qaybta gaarka loo lee-yahay** waxay ku lee-dahay doowr ka duwan digniinta ugu horayso, ay ku jiraan horumarinta awoodaha digniinta ugu horayso ee ururadooda. Waxay warbaahinta ka ciyaartaa doowr muhiim ah si loo sii hagaajiyo garaadka loo lee-yahay masiibada ee dadwaynaha guud aan waxayna faafisaa digniinta ugu horayso. Waxay kale qaybta gaarka loo lee-yahay lee-dahay awood aan daboolnayn oo ballaaran si looga caawiyo bixinta adeegyada xirfadeed ee loo bixiyo nooca xoog-shaqo ee farsamo, aqoonta ama haddiyadaha (qalab ahaan ama lacag caddaan ah) ee alaabo ama adeegyo ah.

**Jaaliyadda cilmiga iyo akadeemiyeed** waxay lee-dahay doowr muhiim ah ee lagu bixinaayo ku soo dabaalidda cilmiga takhasuska ah iyo farsamo ee lagu caawinaayo xukuumadaha iyo jaaliyadaha si loo sameeyo hababka digniinta ugu horayso. Waxay khubaradooda meel-dhexaad u yihiin baarista halisyada dabiiciga ah ee ku dhici karaa jaaliyadaha, iyaga oo gacan ku siinaayo jaan-gooynta cilmiyeed iyo la-socodka isdaba joogga ah iyo adeegyada digniinta, iyaga oo ku kaalmaynaayo is-dhaafsiga faahfaahinta, tarjumidda cilmiyeed ama farsamo ee wararka si ay u noqdaan farriimo la fahmi karo, iyo faafinta fahmidda digniinta la siinaayo kuwa halista ku jiro.

## *Cunsurka muhiimka ah 1:* AQOONSIGA HALISTA

**Ujeeddada:** *In la sameeyo si isdaba joog ah habsocodsiin habaysan si loo soo uruuriyo loona wadaago faahfaahinta, maps-ka iyo qaababka halisyada iyo dayacanka.*

### Falayaasha Muhiimka ah

Maaraynta hay'adaha caalamiga, qarameed iyo deegaaneed; ururada hawada iyo biyaha; xeel-dheerayaasha joqoraafiga fiisikada; culumada arrimaha bulshada; muhandasiinta; qorsheeyayaasha dhulka la isticmaalo iyo magaalaynta; cilmi-baarayaasha iyo akademiyiinta; ururada iyo wakiilada jaaliyadaha ee ka qaybqaato maaraynta masiibada; hay'adaha calamiga iyo kuwa UN-ka sida WMO, UN/ISDR, UNEP, UNU-EHS, UNOSAT, UNDP, FAO, UNESCO.

### Liis warbixineed

**1. Samaynta qabanqaabooyinka abaabulan**

- ☐ Hay'adaha muhiimka ah ee xukuumadda qaranka ee ka qaybqaato qiimaynta halista iyo dayacanka oo la tilmaamay iyo doowrarka oo cad (tusaale, hay'adaha mas'uulka ka ah faahfaahinta dhaqaale, faahfaahinta dadka sida ay kala degaan, qorshaynta dhulka la isticmaalo, faahfaahinta bulshadeed iwm).
- ☐ Mas'uuliyadda layskugu duwaayo tlimaamidda maps-ka halista, qiimaynta dayacanka iyo halista ee loo dhiibay hal urur qarameed.
- ☐ Sharci-dejin ama siyaasadda xukuumadda ee lagu xilsaaraayo u diyaargaroowga dhibaatada iyo maps-ka dhammaan jaaliyadaha ka jiro.
- ☐ Habab qarameed oo si isdaba joog ah loogu soo uruuriyo, lagu wadaago laguna qiimeeyo halista iyo in la sameeyo faahfaahinta dayacanka, lana habeeyo iyada oo lala kaashanaayo dalalka deriska ama gobolka, halka ay ku habboon tahay.
- ☐ Socodsiinta inay xeel-deerayaasha cilmiyeed iyo farsamo ay soo qiimeeyaan ayna dib u eegaan saxnimada faahfaahinta halista iyo wararka la soo sameeyay.
- ☐ Istaratejiyad oo si wax ku ool ah looga qaybgelinaayo jaaliyadaha halista deegaanka iyo in la sameeyo baarista dayacanyada.
- ☐ Socodsiinta dib loogu eegaayo laguna casriyeenaayo faahfaahinta halista ee sanad kasto, waxaana ku jiro wararka ku saabsan dayacan cusub ama soo baxey iyo halisyada samaysmay.

**2. Halisyada dabiiciga ah ee la aqoonsaday**

- ☐ Waxyaabaha u ah tilmaan halisyada dabiiciga ah (tusaale, xoowliga, soo noqnoqoshada iyo malaynta) ee la baarey iyo faahfaahinta taariikhiga ah oo la qiimaayay.
- ☐ Maps-ka lagu timaamaayo halista si loo garto joqoraafi ahaan aagagga iyo jaaliyadaha ay waxyeelayn karaan dhibaatooyinka dabiiciga ah.
- ☐ In la sameeyo map isku xiran (halkii ay suurto gal ka noqoto) si loo qiimeeyo sida ay u wada socdaan halisyada tirada badan ee dabiiciga ah.

**3. Baaridda dayacanka Jaaliyadda**

- ☐ In la sameeyo qiimaynta dayacanka jaaliyadda ee dhammaan halisyada dabiiciga ee ku imaan karaan.
- ☐ Waxaa la tixgeliyay ilaha faahfaahinta taariikhiga ah ee dhacdooyinka halista horay u dhacay ama dhici kara mustaqbalka markii la sameynaayo qiimaynta dayacanimada.
- ☐ Waxaa la tixgeliyay jinsiga, curyaanimada, helitaanka qaab-dhismeedka, kala duwanaanta dhaqaale iyo dareemidda bay'adda.
- ☐ Waxaa la sameeyay dokumenti iyo map ku saabsan dacaynimada (tusaale, dadka ama jaaliyadaha ee deggan xebaha oo la tilmaamay loona sameeyay map).

**4. La qiimeeyo Halista**

- ☐ Isku dhex jirka halista iyo dayacanka oo la qiimeyo waxay sheegayaan halista soo food sarayso gobol kasto ama jaaliyad kasto.
- ☐ Wada tashiga warshadeed iyo jaaliyadeed ee la qabtay waxa ay sugaysaa wararka halista in la garto waxaana ku jiro aqoonta taariikhiga ah iyo dadka u dhashay, iyo wararka deegaanka iyo heerka faahfaahinta deegaanka.
- ☐ Hawlqabadyada oo kor loogu qaadaayo in lagu tilmaansado halista iyo qiimaynta.
- ☐ Natiijooyinka ka soo baxo qiimaynta wada socdo ee maaraynta qorshaha halista deegaanka iyo farriimaha digniinta.

**5. Kaydinta iyo Helidda Wararka**

- ☐ 'Buugkaydka' dhexe ama GIS database waxaa loo sameeyay inay kaydiyaan dhammaan wararka masiibooyinka iyo wararka halista dabiiciga ah.
- ☐ Faahfaahinta halista iyo dayacanka waxaa heli karo xukuumadda, dadwaynaha iyo bulsho-waynta caalamka (halka ay uga habboon tahay).
- ☐ In la horumariyo qorshaha gacan ku haynta si loo dhoowro in faahfaahinta ay ahaato mid mar walba casriyeesan.

## *Cunsurka Muhiimka 2:* LA SOCODKA IYO ADEEGGA DIGNIINTA

**Ujeeddada:** *Samaynta la-socod wax ku ool leh iyo adeegga digniinta oo leh saldhig cilmiyeed iyo teknolojiyadeed ee fiican.*

### Falayaasha Muhiimka ah

Adeegyada qaranka ee saadaalinta hawada iyo biyaha; xarumaha fiirinta takhasuska iyo digniinta (tusaale, biyaha, tsunami, volcano, iyo jawiga); jaamacadaha; machadyada cilmi-baarista; bixiyayaasha qalabka ee qaybta gaarka ah; maamulada isgaarsiinta; tayada maaraynta xeel-dheerayaasha; xarumaha goboleedka gobolka; hay'adaha UN-ka sida UN/ISDR, WMO, FAO, UNESCO, UNEP, UNOSAT, OCHA, ITU.

## Liis warbixineed

**1. Farsamo-hay'adeedka la sameeyay**

- ☐ Socdsiin habaysan, iyo doowrarka iyo mas'uuliyadaha dhammaan ururada ee abuuraayo soona saaraayo digniinta ee la sameeyay laguna xilsaaray sharciga.
- ☐ Heshiisyada iyo hab-raaca hay'adaha isku dhafan ee loo sameeyay si loo sugo joogaynta luqadda digniinta iyo kanaalayaasha isgaarsiinta halkaasi oo dhibatooyinka gacanta loo gelinaayo hay'adaha kala duwan.
- ☐ Qorshaha dammaan halisyada si loo helo is-weedaarsiga waxqabadyada wax ku oolka ah ee ka dhexeeyo hababka digniinta kala duwanaanta.
- ☐ Lamaanayaasha habka digniinta, ay ku jiraan maamulada deegaanka, garashada ururada mas'uulka ka ah digniinta.
- ☐ Hab-raac ka jiro si loo caddeeyo mas'uuliyadaha isgaarsiinta iyo kanaalayaasha adeegyada farsamo ee digniinta.
- ☐ La qabanqaabinta isgaarsiinta ururada caalamiga iyo goboleedka ee lagu heshiiyay iyo hawlqabadeed.
- ☐ Heshiisyo gobaleed, isku duwid farsamooyin iyo xarumaha takhasuska u leh ee diyaar u ah welwel goboleedka sida duufaanada tropical-ka, daadadka ee meelaha wareenada ah, faahfaahinta lays weedaarsado, iyo dhisidda awoodda farsamo.
- ☐ Habka digniinta oo si baaxad leh loo tijaabiyo iyo carbinta ugu yaraan hal mar sanadkiiba.
- ☐ Guddiga dhammaan dhibaatooyinka qaranka ee ku saabsan hababka digniinta ka jiro iyo isku xirka maaraynta qaranka ee masiibada iyo maamulada dhimista, ay ku jiraan qorshaha ballaaran ee qaranka ee dhimista halista masiibada.
- ☐ Habka loo sameeyay in lagu xaqiijiyo digniinta inuu gaaray meelahii loogu talo galay.
- ☐ Shaqaalo loo qoro xarumaha digniinta ee dhammaan waqti kasto (24 saacadood maalintii, toddobo malin toddobaadkii).

**2. Horumarinta la-socodka hababka**

- ☐ Cabbiraadaha qaybaha iyo tilmaamo loo sameeyay halis kasto.
- ☐ Qorshayaasha iyo dokumentooyinka lagu daawanaayo shabakadaha oo la heli karo iyo in heshiis lala galay xeel-dheerayaasha iyo maamulada ay khuseeyaan.
- ☐ Inuu jiro qalabka farasamadeed ee ku habboon xaaladaha deegaaneed iyo shaqaale ku tababaran isticmaalkooda iyo gacan ku hayntooda.
- ☐ Faahfaahinta lagu hirgelinaayo iyo daraasaadka lagu samaynaayo ee laga helaayo shabakadaha gobolka, dalalka isu dhow iyo helitaanka ilaha caalamiga.
- ☐ Faahfaahinta la helay, ee la soo sameeyay iyo ku heliddooda qaababka micnaawiga ah isla waqtiga, ama waqti ku dhow.
- ☐ Istaraatejiyadda jirto si loo helo, dibna loogu eego laguna faafiyo faahfaahinta ku saabsan dayacanka ku xiran halisyada.
- ☐ In la keediyo faahfaahinada si joogto ah loona heli karo si loo xaqiijiyo iyo si loo baaro.

**3. Saadaalinta iyo Hababka Digniinta oo la sameeyay**

- ☐ Daraasadda Faahfaahinta, saadaasha iyo abuurista digniinta e ku salaysan habka cilmiyeed iyo farsamo la oggol yahay.
- ☐ Maaddooyinka faahfaahinta iyo digniinta ee lagu soo saaray hababka iyo hab-raaca caalamiga.
- ☐ Baaridda digniinta ee lagu sameeyey hababka saxda ah ee caalamiga.
- ☐ Xarumaha digniinta ee lagu qalabeeyay qalabka saxda ah ee looga baahan yahay in lagu qabto faahfaahinta iyo in wax looga qabto noocyada saadaasha.
- ☐ Qalabyada ka hortagga xummaashada ee jiro, oo ah sida dib u soo celiyaha tamarta, qalabka oo xad-dhaaf noqdo iyo hababka ku soo wacidda shakhsiga.
- ☐ Digniinta lagu sameeyay laguna faafiyay si habboon iyo waqtiga loo baahnaa iyo qaab ku fiican baahida ku isticmaalaha.
- ☐ Qorshaha oo loo hirgeliyo oo si isdaba joog ah loola socdo oona qiimeeyo socodsiinta hawlqabrkiisa, ay ku jiraan faahfaahinta tayada iyo waxqabadka digniinta.

## *Cunsurka Muhiimka ah 3:* FAADFINTA IYO ISGAARSIINTA

**Ujeeddada:** *Samaynta hababka isgaarsiinta iyo faafinta si loogu sugo dadka iyo jaaliyadaha in horayba looga digo iska caabinta dhacdooyinka halista dabiiciga ah iyo u fududaynta is-weedaarsiga isku duwidda iyo wararka qarameed iyo goboleed.*

### Falayaasha Muhiimka ah

Hay'adaha caalamiga iyo goboleedka ee maaraynta masiibada; adeegyada saadaalinta hawada iyo biyaha; maamulada ciidamada iyo madaniga; ururada warbaahinta (jaraa'idka, telefishanka, radiyaha iyo internet-ka); beecmushtarka ee qaybaha u nugul (tusaale. Dalxiiska, meelaha loogu fududeeyo waayeelka, maraakiibta badda); ururada jaaliyadaha iyo bulshowaynta; hay'adaha caalamiga iyo kuwa UN-ka sida UN/ISDR, IFRC, UNDP, UNESCO, UNEP, WMO, OCHA.

### Liis warbixineed

**1. Habsocodsiinta abaabuleed iyo Go'aan ka gaarsita**

- ☐ Digniinta faafinta tixanaha ah ee lagu xoojinaayo siyaasadda xukuumadda ama sharci-dejinta (tusaale farriinta maareeyayaasha iyo jaaliyadaha iwm).
- ☐ Maamulada la aqoonsan yahay ee loo xoojiyay inay faafiyaan farriimaha digniinta (tusaale, maamulada saadaasha hawada inay bixiyaan farrriimaha jawiga, maamulada caafimaadka inay bixiyaan farriimaha caafimaadka).
- ☐ Hawsha, doowrka iyo mas'uuliyadaha ee fale kasto ee ku jiro socodsiinta faafinta waxaa lagu caddeeyay sharciga u degsan ama siyaasadda xukuumadda ( tusaale, adeegyada saadaasha qaramed ee hawada iyo biyaha).
- ☐ Doowrarka iyo mas'uuliyadaha gobolka ama xadka laga gudbo ee xarumaha digniinta ugu horayso, ay ku jiraan faafinta digniinta ee dalalka deriska ah.
- ☐ Shabakadda iskaa wax u qabso ee loo tabobaray loona xoojiyay inay helaan iyo inay si ballaaran ku faafiyaan digniinta halista meelaha la deggan yahay ee fog iyo jaaliyadaha.

**2. Habab wax ku ool leh ee Isgaarsiin iyo Qalabka oo ku xiran**

- ☐ Hababka isgaarsiinta iyo faafinta ee loogu talogalay baahida jaaliyadaha gooni-goonida ah (tusaale raadiyaha ama telefishinka ee kuwa heli karo; wiishashka, calamada digniinta ama farriin-sidayaasha ordo ee jaaliyadaha meelaha fog-fog ku nool).
- ☐ Teknoloojiyada isgaarsiinta digniinta gaaraysaa dadyoowga oo dhan, ay ku jiraan dadka u socdo xilli-xilli iyo meelaha fog-fog.
- ☐ In ururada caalamagiya ah iyo xeel-dheerayaasha lala tashado si looga gaysto gacan tilmaanta iyo helidda qalabka ku habboon.
- ☐ Warbaahinta tirada badan ee loo isticmaalo faafinta digniinta (tusaale, warbaahinta iyo isgaarsiinta caadiga ah).
- ☐ Heshiisyada lagu horumarinaayo ku isticmaalidda ilaha qaybta gaarka loo lee-yahay halka ay ku habboon tahay ( tusaale, radiyayaasha kuwa barbaradka ah, hoyga badbaadada ).
- ☐ Adkaynta faafinta digniinta iyo hababka isgaarsiinta ee loo isticmaalo dhammaan halisyada.
- ☐ Habka isgaarsiinta ee leh labada dhinac iyo kuwo isku jiro si loo xaqiijiyo in digniinta la helay.
- ☐ Gacan ku haynta qalabka iyo barnaamajka dib u cusboonaynta ee lagu dhaqangelinaayo iyo kuwa xad dhaafka ah ee lagu xoojiyo in dib loo soo celiyo hababka ee jiro haddii ay halaabaan.

**3. Garashada iyo Fahamka Farriimaha Digniinta**

- ☐ Fiijignaanta digniinta iyo farriimaha loogu talogalay baahida gaarka ah ee kuwa halista ku jiro tusaale, kala duwanaanta dahqanka, bulsho, galmo, luqad iyo saldhigga waxbarasho).
- ☐ Fiijignaanta digniinta iyo farriimaha waa kuwo joqoraafi ahaan loogu talogalay in lagu sugo in digniinta tahay mid loogu talogalay kuwa halista ku jiro.
- ☐ Farriimaha la socdo fahmidda qiimaha, welwelka iyo danaynta kuwa u baahan in ay qaadaan fal (tusale, tusaalooyinka lagu badbaadinaayo xoolaha iyo xayawaanada guri joogtada ah).
- ☐ Fiijignaanta digniinta waa mid si cad loo aqoonsan karo waana sii xoogaysanaysaa ilaa waqti waxaana ku jiro wax-qabad la sii-wado markii loo baahdo.
- ☐ Digniinta gaar u ah dabeecadda halista iyo raadadka ay eebanayso.
- ☐ Farsamada jirto si loogu wargeliyo jaaliyadda markii ay halista dhammaato.
- ☐ Daraasadda ah sida ay dadka u helayaan una turjimaan farriimaha digniinta ugu horayso ee la soo sameeyay iyo casharada laga bartay ee ka midka ah socodsiinta qaababka farriimaha iyo faafinta.

## *Cunsurka muhiimka ah 4:* AWOODDA JAWAABCELINTA

**Ujeeddo:** *Xoojinta awoodda ka jawaabidda masiiboyiinka ee jaaliyadaha, ayagoo isticmaalaayo waxbarasho sare ee ku saabsan halista masiibada, ka qayb galka jaalliyadaha iyo u diyaar-garowga masiibada.*

### Falayaasha muhiimka ah

Ururyada aasaaska ee bulshada; dugsiyaha; jaamacadaha; waaxda waxbarashada aan rasmi ahayn; War-baahinta (qoraal, raadiyaha, telefishinka, internet'ka); wakaalado ku takhasuusan halisyada; wakaaladaha maareynta masiibada degaanka, qaranka ama caalamiga; wakaaladaha maareynta masiibada degaanka; hay'adaha caalamiga iyo kuwa UN'ka sida OCHA, UNDP, UNEP, FAO, UNESCO, UN/ISDR, IFRC, WMO.

### Liis warbixineed

**1. Digniinta oo la xushmaayay**

- ☐ In digniinta la sameeynaayo laguna jeediyo dadka halista ku jira inay sameeyaan qoloyiinka la aaminsan yahay (tusaale ahaan dawladda, hoggamiyayaasha diinta, ururada jaaliyadda oo si fiican loo xushmeeyo).
- ☐ In la baaro aragtida dadwaynaha ee ku saabsan masiiboyinka iyo adeegga digniinta si loo saadaaliyo jawaabta jaaliyadda.
- ☐ Xeelo lagu dhiso aaminaadda horumarinta digniinta (tusaale, fahmidda kala duwananshaha saadaaliska iyo digniinta).
- ☐ Digniinta runta ahayn oo la yareeyo iyo horumarinta si loo sii haayo aaminadda habka digniinta.

**2. Diyaarinta qorshaha Jawaabcelinta iyo u Diyaargaroowga masiibada**

- ☐ Qorshaha diyaargaroowga iyo jawaabcelinta masiibada oo sharciga xoojiyay.
- ☐ Qorshaha diyaargaroowga iyo jawaabcelinta masiibada oo lagu bar-tilmaameeyay baahida shakhsiyeed ee jaaliyadaha dayacanka ah.
- ☐ Map'yada halista iyo dayacanka ee loo isticmaalo horumarka qorshaha diyargaroowga iyo jawaabcelinta deg-degga ah.
- ☐ In la sameeyo qorshaha diyargaroowga iyo jawaabcelinta de-degga ah oo casriyaysan, la kala siiyo jaaliyadda iyo la tababaro.
- ☐ Masiiboyiinka horey u dhacey iyo jawaabcelintooda o la baarey, iyo waxii laga bartey in lagu daro qorshaynta maareynta masiibada.
- ☐ Wax qabadka la sameeyay si loo sugo diyargaroowga halisyada si noq-noqosho ku dhaca.
- ☐ Baaritaanyo, iyo tababar o si joogta ah loo sameeyo si loo baaro wax qabadka fidinta digniinta ugu horeyo iyo jawaabtiisa.

**3. Jawaabcelinta Jaaliyadda oo la Baarey lana Xoojiyay**

- ☐ La baaro awoodda fiican ee jawaabcelinta jaaliyadda ku saabsan digniinta ugu horeyo.
- ☐ Jawabcelinta masiiboyiinka horey u dhacey oo la baarey, iyo waxii laga bartey in lagu daro qorshaynta maareynta masiibada.
- ☐ Ururyada xoogga saaro jaaliyadda lala xiriiro sida ay ugu caawiyaan dhisidda waxqabadka.
- ☐ Waxbarashada jaaliyaddaha iyo iska wax u qabso iyo barnaamajyada tababarka oo la fuliyay.

**4. Aqoonsanaanta shabciga iyo waxbarashada oo kor loo qaaday**

- ☐ Warar fudud ee ku saabsan halisyada
- ☐ Dayacanka, halisyada, iyo sida loo yareeyo wax-yeelanta masiibada in la siiyo jaaliyadaha dayacanka ah iyo dadka go'anka gaaro.
- ☐ In jaaliyadaha la baro sida digniinta loo bixin dono iyo meelaha ay ka aamini karaan digniintaan iyo sida looga jawaabceliyo halisyada kala duwan markii aad maqasho digniinta ugu horeyso.
- ☐ Jaaliyadaha oo loo tababaray si ay u kala gartaan halista ka imaada dhulka ama biyaha, si ay si deg-deg ah uga jawaabaan.
- ☐ Aqoonsanaan iyo waxbarashada sii socdo ee dadwaynaha oo lagu sii darey manhajka dugsiga laga soo bilaabo dugsiga hoose ilaa jaamacadda.
- ☐ Isticmaalida war-baahinta iyo dhaqanka ama war-baahin kale sida loo horumariyo aqoonsanaanta shacabka.
- ☐ Aqoonsanaanta shacabka iyo ololeyaal loogu talagalay baahida gaarka ah ee dhagayste walba (tusaale ahaan carruurta, maareeyaha xaaladaha deg-degga, war-baahinta).
- ☐ Barnaamajyada aqoonsanaanta shacabka oo la qiimayay sandkiiba mar lana cusboonayay markii loo baahdo.

***Arrimaha udub dhexaadka ah:*** **QORSHAYAASHA XUKUMIDDA IYO HAY'ADDA**

**Ujeeddo:** *Samaynta qaab-dhismeed hay'adeed, sharciyeed iyo siyaasadeed ee taageerayo fulinta iyo dayac-tirka digniinta ugu horayso oo la xoojiyay.*

## Falayaasha muhiimka ah

Hoggaamiyayaasha Siyaasadeed; Siyaasad sameeyayaasha (tusaale ahaan waaxyada beey'ada, horumarinta iyo qorshaynta); wakaaladaha maareynta masibada degaanka, qaranka ama caalamiga; Ururyada Saadaalinta Hawada iyo biyaha; cilmi-baareyaasha iyo bareyaasha; ururyada aan dowliga ahayn; hay'adaha caalamiga iyo kuwa UN'ka sida UNDP, UNEP, FAO, UNESCO, UN/ISDR, WMO, World Bank iyo bangiyada horumarka gobolka, IFRC.

## Liis warbixineed

**1. Digniinta ugu horayso oo lagu ilaalinaayo inuu ahaado mid siyaasad qarameed iyo degaaneed Xilli dheer u ah**

- ☐ Faa'iidada maaliyadeed ee digniinta gu horayso oo la tusiyay hoggamiyayaasha sare ee dawlada iyo kuwa siyasadeed ayagoo loo isticmaalayo habab camali ah sida baaritaanka lacagta ku baxay masiiboyiinka horey u dhacay.
- ☐ Tusaaloyin iyo xaalad wax barasho ka soo baxay habka digniinta ugu horayso ee guul leh ee la kala siiyay hoggamiyayaasha sare ee dawlada iyo kuwa siyasaadeed.
- ☐ Nooc digniin ugu horayso ama "abaabuleyaal" oo ku hawlan talobixinta digniinta ugu horayso oo dalacsiinayo faa'iidadiisa.
- ☐ Helidda halista ugu wayn e u baahan digniinta ugu horayso, iyo samaynta hab-socodka wax-ku-qabadka halisyada kala duwan.
- ☐ Ku daridda digniinta ugu horayso qorshaha maliyadeed ee qaranka.

**2. Samaynta qaab-dhismeedka Sharciyeed iyo Siyasadeed ee lagu tageeraayo Digniinta ugu Horeya.**

- ☐ Siyasad iyo sharci qarameed ee loo sameeyey sida lagu bixiyo wax-qabad sharciyeed ee lagu fulinaayo digniinta ugu horeya.
- ☐ Doori iyo mus'uuliyad cad ee ururyada oo dhan (kuwa dawlada ah iyo kuwa kale) ee ku lug leh digniinta ugu horeyso.
- ☐ Mas'uuliyad kooban iyo awood isku xirid oo la siiyay hal hay'ad qarameed.
- ☐ Hal hoggamiye siyasadeed ama mid sarkaal ka ah dawladda oo awood sharciyeed u leh inuu go'aan qaran gaaro.
- ☐ Siyaasado loo sameeyay in maareynta masiibada looga dhigo mid dhexe eheen iyo in la horumariyo ka qayb galka jaaliyadda.
- ☐ Go'aan gaarista degaanka iyo fulinta digniinta ugu horayso o la siiyo maareeyayaal kala duwan oo wax-qabad dabbiraad u leh heerka qarameed iyo goboleed.
- ☐ Heeshiisyada qarameed iyo kuwa xudduudada oo la sameeyay si loo hubiyo in la isku daro hababyada digniinta ugu horeyso.
- ☐ Xiriirka iyo iskaashatada ka dhexeeyo ururyada oo dhan ee ku lug leh digniinta ugu horeyso in la isku xiro iyo la hoos keno isla hay'ad.
- ☐ La sheego awoodda wax-qabadka.
- ☐ Digniinta ugu horeya in lagu daro siyaasadaha iyo horumarka yareenta masiiboyiinka.
- ☐ Nidaamka ilaalinta iyo fulinta oo diyaar u ah inuu taageero siyaasadaha iyo sharciga.

**3. Awoodda hay'adaha oo la baarey lana xoojiyay.**

- ☐ Awoodda ururyada iyo hay'adaha ka qayb galo oo dhan in la baaro iyo in qorshaha wax-qabdka iyo barnaamajka tababarka oo la horumariyay ama la raadiyay.
- ☐ Hay'adaha dawliga ah oo lala xiriiray laguna dhiirrigiliyay inay ka qayb qaataan awoodda wax-qabadka.

**4. Maal gelinta oo ah mid bad-baadsan**

- ☐ Habka malgelinta dawladda ee digniinta ugu horeya iyo isku diyaarinta masiibada oo la horumariyay iyo layskugu keenay hal hay'ad.
- ☐ La baarey helidda maal gelinta gobolka ama caalamiga.
- ☐ Iskashatada dadwaynaha/shakhsiga loo isticmaaley si lagu caawiyo hormarinta digniinta ugu horeya.

# LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY

| | |
|---|---|
| EWC III | Shirka Saddexaad ee Caalimiga ah ee Digniinta ugu Horayso |
| FAO | Ururka Cuntada iyo Beeraha |
| IFRC | Hay'adda caalamiga ee Laan-qeerta Cas iyo Jamciyadaha Bisha Cas |
| ITU | Ururka Isgaarsiinta Caalamiga |
| NGO | Ururka aan Dowliga ahayn |
| OCHA | Xafiiska Isku-duwidda Arrimaha Aaadanaha ee Xoghaynta Qaruumaha Midoobay |
| PPEW | Saldhigga Horay loogu dhigaayo Digniinta ugu Horayso |
| UN | Qaruumaha Midoobay |
| UNDP | Barnaamajka Horumarinta Qaruumaha Midoobay |
| UNEP | Barnaamajka Bay'adda Qaruumaha Midoobay |
| UNESCO | Ururka waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka ee Qaruumaha Midoobay |
| UN/ISDR | Istaraajeediyada Caalamiga ee Dhimista Masiibada ee Qaruumaha Midoobay |
| UNOSAT | Bilaawidda lagu bixinaayo jaaliyadda aadamiga ee helitaanka muuqaalka satellite-ka iyo adeegyada habka Wararka Joqoraafiga ee Qaruumada Midoobay |
| UNU-EHS | Machadka jaamacadda Qaruumaha Midoobay ee Bay'adda iyo Nabadsugidda Aaadanaha |
| WMO | Ururka caalamiga ee Saadaalinta Hawada |

## Wararka la soo Xiriiridda

**UN/ISDR Platform for the Promotion of Early Warning (PPEW)**
Hermann-Ehlers-Strasse 10
D - 53113 Bonn
Germany
isdr-ppew@un.org
www.unisdr-earlywarning.org

**UN Secretariat of the International Strategy for Disaster Reduction (UN/ISDR)**
Palais des Nations
CH - 1211 Geneva 10
Switzerland
isdr@un.org
www.unisdr.org

*Dokumentigaan waa natiijada ka soo baxay Shirka Saddexaad ee caalamiga ah ee ku saabsan Digniinta ugu Horayso (EWC III) oo ay Xukuumadda jarmalka u soo qabanqaabisay Qaramada Midoobay 27 ilaa 29 Maarso 2006, Bonn, Jarmalka.*